

AMARADDA SHARCIGA AH IYO IDAARIGA

XEER GOLAHA SARE EE KACAANKA

SHARCI Lamb. 27 Maay 1970

Wax ka beddelid Qod. 8 ee Sharciga lamb 8 ee 26 Janaayo 1970

GOLAHA SARE EE KACAANKA

Kadib markii la arkay Baaqa Kowaad ee Kaacanka.

Kadib markii la arkay Sharciga lamb. 1 ee 21 Oktoober 1969.

Kadib markii la garoowsaday baahida loo qabo in la beddelo qod. 8 ee sharciga 8 ee 26 Janaayo 1970.

Kadib soo jeedinta Xoghayaha Dowladda ee Garsoorka, Arrimaha Diinta iyo Shaqada.

WUXUU ANSAXINAYAA

Sharciga hoos ku qoran:

Qod. 1

Waxaa la beddelaey qod. 8 ee Sharciga lamb 8 ee 26 Janaayo 1970 oo khuseeyey aooda in dacwo la gelin karo Garsoorayasha, iyo Kalkaalayahooda oo sida ku cad qod. 74 ee Xeerka Habka Ciqaabta uu u oggoladay Xoghayaha Dowladda ee Garsoorka, Arrimaha Diinta iyo Shaqada.

Qod. 2

Sharcigaan wuxuu hirgeli doona 21 Oktoobar 1969 waxaana lagu soo daabici doona Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Dimuqraatia Somaliya.

Muqdisho, 26 Maay 1970.

Madaxweynaha

Golaha Sare ee Kacaanka

SG Mohamed Siyaad Barre

Xoghayaha Dowladda ee Garsoorka, Arrimaha Diinta & Shaqada

Prof. Abdulqani Sh. Axmed